

Ma in aan deganaadaa Magaalada Greeley si aan u dalbado kharash-celinta?

- Haa, kaliya waxay ku xadidan tahay dadka degan Magaalada Greeley inay dalbadaan kharash-celintan.

Ma in aan buuxiyaa foomkan hadii aan buuxiyay sanadkii hore?

- Haa, waa inaad mar kale buuxiso. Cabirka qoyskaaga ayaa is bedeli kara hadii ruux uu dhasho ama uu dhinto. Buuxinta mar kale ayaa naga caawinaysa in aanu dedejino nidaamka helitaanka kharash-celintaada.

Ma in aan keenaa lambarka Sooshaal Sekuuritiga caruurtayda?

- Jawaab: **Haa.** Kuwan waxaa loogu baahan yahay xaqijinta qoyska.

Ma in aan raaciyyaa cashuur celintayda dakhliga hadii aan soo dirayo W-2-gayga?

- Haa, waxa loo baahan yahay inaad raaciso nuqulka cashuur celinta dhakhliga aad xaraysay. Si aad ugu qalanto kharash-celinta, waa inaad xarayso cashuurtaada hadii loo baahan yahay.

Ma in aan raaciyyaa gunooyinkayga dakhliga ee Adeegyada Bulshada ee Degmada Weld aan ka helo?

- Haa, waa inaad sheegtaa dhamaan dakhliga adiga ama cid kasta oo qoyskaaga ah ay hesho, xataa hadii ayna ku qornayn foomamka cashuurtaada.

Mudo intee le'eg ayay qaadanaysaa helitaanka kharash-celintaydu?

- Waxay qaadan kartaa ilaa sadex todobaad inaad hesho jeegaaga, deynta biilka biyahana waxa la dabbqi doonaa inta lagu gudo jiro wakhtigaas.

Miyaa labada is qabaa labaduba saxeexayaan arjiga?

- Haa, hadii aad is qabtaan oo aad isku guri degan tiihin, labadiinuba waa inaad saxeexdaan arjiga.

Imisa jeer ayaan dalban karaa barnaamijyadan?

- Waxa aad dalban kartaa hal kharash-celin ama deyn biil sanad kasta hadii aad u qalanto.

Ma waxa aan u baahnahay xisaabta adeega guryeed ee Magaalada Greeley si aan ugu qalmo?

- Haa, waa inaad ku leedahay xisaab adeega guryeed ah Magaalada Greeley si aad ugu qalanto.

Ma in biilka biyaha uu magacaygu ku qoranaadaa?

- Haa, macagaagu waa inuu ku qoran yahay biilka biyaha si aad ugu qalanto.